



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Golaha Shacabka**

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**

**KU SAABSAN**

**ANSIXINTA XUBNAHA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE  
XUDUUDAHA IYO FEDERAALKA**

**Muqdisho, 6<sup>da</sup> Luulyo 2015**

## GOLAHA SHACABKA:

**Markuu Arkey:** Qodobka 111 iyo 111E ee Dastuurka Federaalka;

**Markuu Arkey:** Qodobka 112 ee Dastuurka iyo Qodobka 5aad ee Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan Xuduudaha iyo Federaalka Lam. Yahay 75 ee 31<sup>kii</sup> Diseembar 2014;


**Markuu Arkey:** Soojeedinta R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Lam. XRW/000025/05/15 kuna taariixsan 7/05/2015 oo Golaha soo gaartay 20/05/2015 kuna saabsan codsi Ansixinta Xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka;

**Markuu Ka baaraandegay:** Taariikh nololeedka musharaxiinta loo soojeediyey in ay ka mid noqdaan Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka;

**Asaga oo ku kulansan:** Kalfadhiga 6-aad Kulankiisa 19-aad ee 6<sup>da</sup> Luulyo 2015 ay goobjoog yihiin 187 Xildhibaan, wuxuu codeyn qarsoodi ah ku ansixiyey xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka oo magacyadooda iyo mid waliba tirada cod lagu ansixiyey halkan hoose ku qoran:

<u>Magac</u>	<u>Oggol</u>	<u>Diiday</u>	<u>Aamustay</u>
1. M.ne Abuukar Sh. Cabdi Ibraahim	144	32	9
2. M.ne Cabdikhalikh Cabdullahi Xamsa	145	33	7
3. M.ne Cabdullahi Gacal Cabdi	138	36	11
4. M.ne Khaliif Cabdikariin Maxamed	141	33	11
5. M.ne Liibaan Cali Sahal	137	35	13
6. M.ne Maxamed Muxyadiin Sh. Mursal	141	33	10
7. M.ne Muuse Waxgarad Cabdullahi	137	35	13
8. M.ne Xuseen Xaashi Xasan	141	33	11
9. Marwo Saciido Xasan Cusmaan	139	34	10

Waxaa Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga codsanayaa in uu go'aanka Golaha ku oggolaado Xeer Madaxweyne kuna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jumhuuriyadda Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 90 (f) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya oo sida ku-meel-gaarka loo ansixiyey iyo Qodobka 26aad ee Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka.

  
M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



MJ/AM